# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 37aad fadhigii 09aad**

**23/07/2018**

**Quraanka: -** Md Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Ansixinta Xeerka Waxbarashada

**Guddoomiyaha: -** Mudanayaal Guurtidu waxay soo celisay oo ka soo noqday xeerkii Waxbarashada, iyaga oo qodob ka soo badelay. Markaa waxaynu u codaynayaa sidii hore Goluhu u ansixiyey ee aynu Golaha Guurtida ugu gudbinay ama siday u badeshay Golaha Guurtidu markaa inagu waxaynu u codayn doonaa qodobada qodob qodob, markaa xoghayntu ha u akhrido mudanayaasha:-

**Guddoomiye:-** Waxa fadhiya 47 xuldhibaan markaa qodobka ugu horeeya ee ay wax ka bedelka Golaha Guurtidu ku samaysay xeerka xoghayntu ha akhrido:-

**Xoghayah Guuda:** Wax ka bedel mashruuc sharci ee Xeerka Waxbarashada

**Qodobka 10aad farqada 2aad** Waxay u dhignayd**:** Gugsiyada Qur'aanka Kariimka ah waxaa maamulaaya Wasaarada Waxbarashada, Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, waxa ku yeelanaysaa kormeer.

**Waxay u badeleen: Farqada 2aad:** Gugsiyada Qur'aanka Kariimka ah (Malcaamadaha) waxaa maamulaaya Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, Wasaarada Waxbarashaduna waxay ku yeelanaysaa kormeer.

**Guddoomiye:** Xildhibaanada ogol sidii Goluhu ku ansixiyey gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada Ogol sidii Goluhu ku ansixiyey: 44

Xildibaanada ogol wax ka bedelka Guurtida: 6

Xidhibaanada Aaamusay: 0

Guddoomiyuhu: ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Waxa xeerkan loo raacayaa sidii hore ee Golaha Wakiiladu ku anixiyeen.

**Qodobka 11aad: Ujeeddoonyinka Waxbarashada xanaanadda Carruurta**

Waxay ku dareen **farqad 6aad** oo u dhigan sidan: la tayeeyo carruurta xarunta Agoomaha ku jirta sida:

**b)** ilma kasta Xarunta Agoomaha ku jirta wuxuu xaq u leeyahay inay wasaaradda Waxbarashadu siiso Waxabarasho bilaash ah oo ka bilaabmaysa barbaarinta ilaa heer jaamacadeed.

**t)** Ilmaha Xarunta Agoomaha ku jiraa waa inuu helaa dhammaan qalabka Waxbarashada oo dhammaystiran.

**j)** Waa in ay helaan macallimiin ka caawisa barshada Qur'aanka Kariimka ah.

**Guddoomiye:** farqadani way cusub tahay oo Guurtida ayaa ku soo dartay Xildhibaanada ogol in la ansixiyo **farqadan 6aad** gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol ku darida **farqad 6aad** ee Golaha Guuritda: 33

Xildibaanada diiday ku darida **farqad 6aad** ee Golaha Guuritda: 15

Xidhibaanada Aaamusay: 3

Guddoomiyuhu: ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Waxay ogolaadeen mudanayaashu sidii ay soo jeediyeen Golaha Guurtida oo ahayd in ay ku dareen **farqad 6aad**.

**Qodobka 13aad: Manhajka Gugsiyadda Xanaanadda Carruurta**

Qodobkani waxa uu ka koobnaa 5 farqadood, waxaanay Golaha Guurtidu ku dareen 2 farqadood oo kala ah **farqad 6aad** iyo **farqad 7aad** oo u dhigan sidan:-

**6)** Waxbarashada xanaanadda Carruurta waxaa geli kara arday da'diisu u dhaxayso saddex jir ilaa lix jir.

**7)** Ilma kasta oo da'diisu u dhaxayso saddex jir ilaa lix jir waxa uu xaq u leeyahay Waxbarashada xanaano carruureed looguma diidi karo sababo aan maangal ahayn.

**Farqada 4aad** Golaha Wakiiladu waxay u dhigeen xeerka Waxbarashada saddex maaddo oo kala ah Barashada **Diinta Islaamka, Af-soomaali, Af-Carabiga.** Golaha Guurtidu waxay ku soo kodhiyeen Maadada **Xisaabta.**

**Guddoomiye:** Xildhibaanada ogol 2 farqadood ee lagu soo daray in sidaa Goluhu Guurtidu u dhigay ku ansixino gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Goluhu u ansixiyeen: 33

Xildibaanada ogol sida guurtidu u dhigeen: 9

Xidhibaanada Aaamusay: 10

Guddoomiyuhu: ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha wakiiladu u ansixiyeen

**Qodobka 16aad: Da'da Isqorista Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiga Hoose/Dhexe)**

**Qodobka 16aad** Innagu waxaynu u dhignay saddex farqadood, Golaha Guurtiduna waxay ku dareen **farqad 4aad**.

**Farqada 1aad** Waxay u dhignayd sidan: - **1)** Muddada Waxbarashada Dugsiga Hoose/Dhexe waa 8 sanno, waxaana la qori karaa ilma 6 sanno jir ah kana weynayn 14 sanno.

**Waxay u badeleen sidan: 1)** Muddada Waxbarashada Dugsiga Hoose/Dhexe waa 8 sanno, waxaana la qori karraa fasalka koowaad ilma gaadhay 6 sanno jir ah kana weynayn 9 sanno.

**Farqada 2aad** Waxay u dhignayd sidan: **2)** Ardayna looguma diidi karo Waxbarashada aasaasiga ah in uu ka weyn yahay da'dii loogu talo-galay, haddii ay jiraan sababo maangal ahi.

**Waxay u badeleen sidan: 2)** Ardayna ka weyn 9 sanno Waxbarashada u baahan waxa uu gelayaa Waxbarashada dadban.

**Guddoomiye:** Xildhibaanada ogol sidii uu Goluhu kaga baxay in lagu ansixiyo gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Goluhu u ansixiyeen: 38

Xildibaanada ogol sida guurtidu u dhigeen: 12

Xidhibaanada Aaamusay: 2

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha wakiiladu u ansixiyeen.

**Qodobka 17aad: Manhaj Dugsiyadda Hoose/Dhexe**

Waxaa ku waajib ah dhammaan dugsiyadda hoose/dhexe ee Dawladdu maamusho in ay isticmaalaan Manjahka ay dejisay/so Wasaaradda Waxbarashad iyo Tacliinta sare haddii aan si gaar ah looga dhaafin.

**Waxay u baddeleen sidan: -** Waxaa ku waajib ah dhammaan dugsiyadda hoose/dhexe in ay isticmaalaan Manjahka ay dejisay/so Wasaaradda Waxbarashad iyo Tacliinta Sayniska haddii aan si gaar ah looga dhaafin.

**Sababayn:** Qodobkan waxa laga saaray Dugsiyadda Dawladdu maamusho, waxaana laga dhigay si guud.

**Guddoomiye:** Xildhibaanada ogol sida Guurtidu u dhigtay gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sida guurtidu u dhigeen: 29

Xildhibaanada Ogol sidii Goluhu u ansixiyeen: 11

Xidhibaanada Aaamusay: 12

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 18aad: Afka Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiyadda Hoose/dhexe)**

**Qodobkani waxa uu ka koobnaa 2 farqadood, waxay iyagu ku soo dareen farqad 3aad oo** u dhigan:-

1) Dugsiyadda Hoose/Dhexe waxaa lagu dhiganayaa Af-soomaali.
2) Haddii afka wax lagu bartaa uu yahay mid aan ahayn af-soomaali, waxaa waajib ah in Af-soomaali maaddo ahaan loo dhigo.

Waxay u beddeleen **farqada 1aad**: 1) Dugsiyadda Hoose waxaa lagu dhiganayaa Af-soomaali haddii aanay Wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin.

Waxay soo kordhiyeen **farqad 2aad:** Dugsiyadda Dhexe waxaa lagu dhiganayaa Af-Engiriisi haddii aanay wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin.

**Farqadii 2aad** Waxay u guurtay oo ay noqotay **Farqada 3aad**.

**Guddoomiye:** Xildhibaanada ogol sidaynu ku ansixinay gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Goluhu u ansixiyey: 11

Xildhibaanada Ogol sidii Goluhu u dhigeen: 32

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 22aad: Noocyada Waxbarashada Dugsiyadda Sare**

**Guddoomiyaha:-** Xildhibaanada ogol in lagu ansixiyo sidii Golaha Wakiiladu kaga baxay gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 30

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 1

Xidhibaanada Aaamusay: 21

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobka 27aad: Tacliinta Sare (Heerka Saddexaad)**

**Qodobka 27aad farqadiisa 1aad** waxay u dhignayd sidan**: 1)** Waxa ay dawladdu u **abuuraysaa** Goobaha Tacliinta Saree ee Qaranka si waafaqsan Xeerka Tacliinta Sare**.** Kalmadda **"U abuuraysaa"** Waxay ku beddeleen **"u ansixinaysaa".**

**Farqada 5aad** waxay u dhignayd sidan: **5)** Furitaanka goobaha Tacliinta Sare, Qiimayntooda, Kormeerkooda iyo maamuliddooda waxa qeexi doona xeer**.**

**Waxay ku beddeleen Farqada 5aad sidan**: **5)** Furitaanka goobaha Tacliinta Sare, Qiimayntooda, Kormeerkooda iyo maamuliddooda waxa qeexi doona xeerka Tacliinta Sare**.**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Guurtida u soo gudbiyeen gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 30

Xildhibaanada ogol sidii Golaha wakiiladu u ansixiyey: 11

Xidhibaanada Aaamusay: 11

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: **Farqadaha 1aad iyo 5aad ee Qodobka 27aad** waxay uu ku ansaxeen sidii Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 30aad: Xeerarka Tacliinta Sare**

**Farqada 1aad xarafka A, waxay** u dhignayd sidan: **a)** Waxbrashada macaahida Tacliinta Sare **(College)** ama Macaahida farsamada **(Polytechnics)** waxayna bixinaysaa Shahaadooyin **(Certificate)** ama diploma ka dib marka muddo 1-2 sanno oo Waxbarasho ah.

**Farqada 1aad** Halkii ahayd 1-2 sanno xiliga waxbarshada diploma-ka waxay ku beddeleen muddo lix bilood ah (6 bilood).

**Farqada 1aad Xarafka C,** waxay u dhignayd sidan:- C) Waxbarshada Degree-ga labaad **M.A** ama **M.Sc (Post graduate Studies)** waxay bixinayaan Shahaadooyinka **M.A** ama **M.Sc** ka dib 1-2 sanno.

**Farqada 1aad** Halkii ahayd 1-2 sanno xiliga waxbarshada heerka labaad waxay ku beddeleen muddo sanad iyo Badh ah ( 1 sanno iyo b bilood).

**Guddoomiyaha:-** Xildhibaanada ogol in lagu ansixiyo sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 30

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 7

Xidhibaanada Aaamusay: 15

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobka 32aad: Hubinta Manhajka Waxbrashada Xarumaha Tacliinta Sare ama Jaamacadaha**

Waxay kalmaddii ahayd **"BOD"** waxay ku beddeleen **"Koomiishan"**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol wax ka beddelka Golaha Guurtida gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 30

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 3

Xidhibaanada Aaamusay: 19

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobkan waxa lagu ansxiyey sidii Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 33aad: Waxbarashada Dadban**

**Qodobka 33aad Waxaynu ku anixinay markii hore 2 farqadood, waxayna ku soo dareen 1 farqad oo cusub.**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol farqada cusub ee Golaha Guurtida ku soo dareen gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 29

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 19

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobkan waxa lagu ansxiyey sidii Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 35aad: Noocyada Waxbarashada Dadban**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in lagu darro **2 farqadood** ee Golaha Guurtidu gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 35

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobkan waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 36aad: Afafka Waxbarashada Dadban iyo Qorista**

Waxaynu markii hore ku ansixinay 2 farqadood, waxayna ku soo dareen farqad 3aad

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in farqad 3aad lagu daraa gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 29

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 6

Xidhibaanada Aaamusay: 17

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobkan waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Xubinta 3aad:**

**Waxbarashada farsamada iyo Xirfadaha**

**Qodobka 38 ilaa 50aad** Waxay ku soo kordhiyeen qodobadan waxaanu u dhigeen waa la soo kordhiyey.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in qodobada 38aad iyo 50aad sidii Goluhu ku ansixiyey loo daayo gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 31

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 21

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 38aad ilaa 50aad waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Wakiiladu hore ugu ansixiyeen.

**Qodobadda 51aad ilaa 90aad**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in Qodobadda 51aad ilaa 90aad loo ansixiyo sidii ay Golaha Wakiiladda kaga baxeen gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 28

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 20

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 51aad ilaa 90aad waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Wakiiladu hore ugu ansixiyeen.

**Qodobka 91aad: Dambiyadda la xidhiidha Diiwaan-gelinta Goobaha Waxbarshada ee Gaarka ah.**

**"Cid kasta"** waxa lagu beddelay **"Qof kasta**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in **"cid kasta"** lagu beddelo "**Qof kasta"** gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 31

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 21

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobkaasi waxa uu ku ansaxay siday Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobadda $92^{aad}$, $101^{aad}$, $105^{aad}$, , $120^{aad}$ ,$121^{aad}$, $125^{aad}$, $126^{aad}$ iyo $136^{aad}$**

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in Qodobadda **$92^{aad}$, $101^{aad}$ , $105^{aad}$, $120^{aad}$ , $125^{aad}$, $126^{aad}$ iyo $136^{aad}$** loo ansixiyo sidii ay Golaha Wakiiladda kaga baxeen gacanta ha taagaan

Xildhibaanada fadhiya: 53

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 30

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 4

Xidhibaanada Aaamusay: 18

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha**: Qodobadaas waxa Golaha Wakiiladu ansixiyeen sidii hore ee ay Golaha kaga baxeen.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**---------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**-----------------------------------**